Australian Government

Warxumo tashiilka iyo runta ku saabsan Coronavirus (COVID-19)

BEEN: Waxaad ku daaweyn kartaa coronavirus antibiyootig ama daawooyinka malaariyada

RUN: Wax tallaal ah ama daaweyn loogu talagalay ma laha coronavirus weli.

Cilmibaarista aduunka oo dhan waxay si adag uga shaqeynayaan si ay ugu sameeyaan tallaal fayraska laakiinse ma garaneyno ilaa intay tani qaadaneyso. Qiyaastu way kala duwan tahay waxayna u dhaxeysaa 12 ama 18 bilood.

Cilmi baarayaashu sidoo kale waxay eegayaan isticmaalid daawo ka duwan oo laga yaabo inay caawiso daaweynta coronavirus oo ay ku jirto lafa xannuunka, daawada malaariyada iyo HIV. Ma daaweyn doonaan coronavirus laakiinse waxay yareynayaan tirada dadka ah ee fayraska iyo darnaanta kiisaska.

Waa muhiim, sidaa daraadeed, ha sugin tallaal ama daaweynta coronavirus – taasina waa sababta talaabooyin bdan oo ah caafimaadka dadweynaha looga qabatimay Australia oo dhan.

BEEN: Carruurtu waa ‘faafiyayaasha ugu sareeya’ ee coronavirus

RUN: Iyadoo la ogyahay in carruurtu ay noqon karan ‘faafiyayaasha ugu sareeya’ ee jeermiska iyo bakteeriyada guud ahaan, xaqiiq ahaan wixii ah hargabka waxay noqon karaan , tani uma eka inay noqoneyso xaalada coronavirus. Ugu yaraan weli ma aha. Mar jirto wax macluumaad ah meel kasta oo aduunka ka mid ah oo muujineysa in faafitaanka ugu weyn ee fayraskani inuu ku dhacay carruurta. Tan iskama deynayno. Waa suurtagal. Laakiinse dhammaan cadeymuhu waxaa weeye inaysan ahayn faafiyayaasha ugu sareeya ee coronavirus.

BEEN: Dadka Australian ka ahi ma heli karaan qalab daawo oo ku filan iyo alaab (aalada neefsiga, maaskarada iyo alaabta wax lagu baaro)

RUN: fariinta ugu sahlan ee bukaanka iyo ta ugu muhiimada badan, shaqaalaha caafimaadka ee iyaga xannaaneeya, ayaa ah – haa, Australia waa heysataa qalab ku filan oo ay kula dagaalanto faafitaankan. Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira dareen ah

dhammaan aalada wax baarista la xiriirta baahida aduunka looga qabo awgeed oo aad u dhaaftay awooda soo saarida iyo keenitaanka.

Shaqaalaha waxaan hubaal ugu sheegeynaa inay jiraan qalabka ilaalinta shakhsiyeed oo imanaya wakhti kasta, oo micnaheedu yahay, bedel ahaan in rakaabku ay helaan daryeelka ugu wanaagsan ee suurtagalka ah. Tusaale ahaan keydka Daawada Qaranku wuxuu heystaa wax ka badan 10 milyan maaskaro afka lagu xirto. Dawlada australia waxay sii wadaysaa inay ka shaqeyso helidia maaskarooyin dheeraad ah si loo hubiyo in Keydka Daawada Qaranku uu ahaado mid si fiican loo keydiyey. Australia waxay heysataa qalabka ilaalinta shakhsiga oo ku filan si ay u taageerto xirfadlayaasha caafimaadka isla marka faafitaanku uu soo socdo. Tan waxaa ka mid ah xoojinta wax soosaarta gudaha.

Waxaa badanaa jira ilaa 2200 sariiro isbitaal oo qalabka lagu neefsado leh australia gudaheeda. Iyadoo mishiinada dadka marka la suuxinayo dib loo farsameeyey ujeedadooda iyo qalab kale ilaa iyo lixdii toddobaad ee la soo dhaafay, hadda waxaan heysanaa ilaa 4400 oo sariirood oo leh qalabka lagu neefsado, waxaana doonaynaa inaan gaadhsiino ilaa 7500.bilowgii Abriil, tirada bukaanka qaba coronavirus ee ku jira unugyada daryeelka degdega ah ee u baahnaa qalafka lagu neefsado waxay ahayaayeen 20.

Shabakada Cudurada laysqaadsiiyo Australia maalin kasta ayey kulmayaan si ay dib ugu qiimeeyaan tilmaamaha waxyaalaha looga baahan yahay baaritanka, saa daraadeed baaritaanka lagama maarka ah in la sameeyo.

BEEN: Isbitaalada Australia ma awoodi doonaan inay la qabsadaan baahida korortay coronavirus awgeed

RUN: Australia'sIsbitaalada dadweynaha iyo kuwa gaarka ah ee Australia waxay isku biiriyeen xoogga si ay ula wada dagaalamaan coronavirus ka. Shirkow taariikhi ah oo dhaxeeya Dawlada Australiaya, dawladaha territory ga iyo gobolada iyo qaybaha isbitaalka gaarka ah waxay diyaargareynayaan 34,000 sariirood iyo 105,000 shaqaalaha caafimaadka ee dalka oo dhan si ay uga caawiyaan la dagaalanka coronavirus.

Qaybaha gaarka ah waxay bixin doonaan adeegyada isbitaalka bukaanka dadweynaha, iyagoo u diyaarinaya qalabkooda, sariiraha, alaabta iyo shaqalahaba inay xoojiyaan nidaamka dawlada ee dadweynaha.

Waxay sidoo kale sii wadayaan inay taageeraan baahida joogitaanka dheer ka qaybgalayaasha Ceymiska Naafada Qaranka dadweynaha iyo bukaanka daryeelka dadka da'da ah iyo bukaankan baahida guud qaba.

Shirkadani waxay hubinaysaa in ilmaha keydka oo dhan ee nidaamka caafimaad ee heer ka aduunka ah ee australia inay diyaar u yihiin oo xoogga la saaro daaweynta bukaanka sida loogu baahan yaay faafitaankan.

BEEN: Laba toddobaad oo xirnaan ah ayaa joojin doonta faafitaanka coronavirus

RUN: Imposing Saarida xannibaadyo laba ilaa saddex toddobaad ka dibna qaadidooda iyo noqoshada nolosheena caadiga ah ma joojin doonto faafitaanka coronavirus.

Khatarta kaliya ee laba toddobaad oo xirnaan ah coronavirus miyuu mar labaad la soo bixi doonaa madaxiisa foosha xun, lacala aad uga xoog badan hore.

Dadka qaarkii waxay weydiinayaan maxaynu u soo saari weynay wada xirnaan dhammeystiran sida dalalka kale ay sameeyeen. Jawaabatani waxaa weeye in oo aan la mid ahayn sida dalalaka talyaaniga, isbaanishka iyo Iiraan iyo magaalooyinka Wuhan ee Shiinaha, meeshii ay faafitaanku uu ka bilowday, waxaan baaqi ku noqonay qalooca hortiisa.

Wakhtiga khubarada caafimaadka ee dalalkan ay garteen wixii dhacayey, coronavirus ku wuxuu ahaa mid kontorool la'aan ah oo u fidayey sida dabka. Tani waa sababta isbitaalada dalalkani ay ula halgamayeen inay la qabsadaan dadka qaba noocyada daran ee cudurkaan.

Khubarada kale ee caafimaadka waxay sii wadi doonaan inay la socdaan kaysaska cusub maalin kasta ee australia dhexdeeda iyo meesha isugudbintu ay ka dhaceyso. Ka dib waxay sameyn doonaan tallooyin ku saleysan caddeyn ah wixii xeerar ah cusub ah ama xanibaadyo ee u baahan in meel la dhigo. Qof walba waa inuu la socdaa xanibaadyaha hadda jira ayagoo booqanaya www.australia.gov.au.

BEEN: Baaritaanka qof walba ayaa joojinaya faafitaanka coronavirus

RUN: Baaritaanku ma joojiyo faafitaanka fayraska.

Sida fayras kasta, COVID-19 wuxuu ka guuraa hal qof oo uu utagaa qof kale. Wakhti kasta kala fogaanta bulsho oo kaliya, iyo karantiinka guriga haddii aadan caafimaad qabin waxaanad joojin kartaa faafitaanka fayraska.

Baaritaanka lagu xaqiijinayo in haddii qof uu muujinayo astaamo uu qabo COVID-19 ay naga caawineyso raad raacida faafitaanka cudurka oo aan ku yareyno isugudbinta. Haddii aan ognahay inuu qof qabo qofkaasi nafsad ahaantiisa waa inuu isgooni yeelaa waxaana raad raacaynaa ciddii ay la xiriireen si aan u yareyno khatarta isugudbin dheeraad ah.

Si kastaba ha ahaatee, inaan lagaa helin COVID-19 micnaheedu ma aha inaadan nafsadaada khatar ku ahayn ama aadan kuwa kale khatar ku ahayn. Waxaad sheegi kartaa inaadan qabin COVID-19 ka dib markii lagu qaadsiiyey ka hor intaadaan yeelan astaamo. Waxaad noqon kartaa qof aan laga helin hal maalin, qaadina kartaa COVID-19 maalinta ku xigta. Taasi waa sababta ay aadka muhiim ka ugu tahay ku celcelinta nadaafada wanaagsan iyo kala fogaanta bulshada iyo inaad guriga joogtid marka laga reebo wixii lagama maarmaan ah. Tani waxay caawineysaa ka hortaga iskugudbinta keliya ma aha COVID-19 laakiinse cudurada kale sidoo kale, annago yareynayna baahida adeegyadeena caafimaadka.

BEEN: Qalabka baaritaanku sax ma aha

BEEN: Baaritaanka hadda ee COVID-19 wuxuu isticmaalaa waxa loogu yeero bckeuc acid amplification(Polymerase chain reaction (PCR)), oo sax ah. Baaritaanka wuxuu ku lug leeyahay xirfadle caafimaad oo ka qaadaya saami qofka cunihiisa iyo sanka. Wakhtigan dhammaan qaybaha baaritaanka waxaa lagu wershadeeyey dibeda, oo ay ugu badan yihiin Yurub iyo Aasiya. Meesha hawlgabtayaasha qaybaha baaritaanka iyo shaybaarada oo dhan ee gobolada iyo territoriyada waxay isticmaal qaybo kala duwan, xaqiiqda ugu muhiimsan waxaa weeye inay isticmaalaan habab isku mid ah. Waxaa jira dareen ah in dhammaan alaabta la xiriirta baaritaanka baahida aduunka awgeed ee ka badatay saarida iyo keenidooda. Goobta daryeelka baaritaanada jirka sax kuma ah ogaanshaha saa daraadeed laguma talinayo sababtaa awgeed.

Dawlada Australia waxay si aad u dhow ula shaqeynaysaa shaybaarada iyadoo adeegyasaneysa shabakada Shaybaarka Caafimaadka Dadweynaha iyo kuwa kale ee su kii hubiyo alaabta loona sahamiyo xalalka keenidooda mustaqabalka ee bedelka ah si loo hubiyo in australia ay ilaaliso inay le'eg tahay iyo awooda ay ku baareyso coronavirus.

Isticmaal website kan si joogta ah si laguu ogeysiiyo wax ku saabsan waxyaalaha ku soo kordhay ee ugu muhiimsan jawaabta Dawlada Australiya ee COVID-19.

SBS sidoo kale maxay heysaa macluumaad fara badan oo ku saabsan COVID-19 oo luuqadaada ah. Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa app ka taleefanka gacanta oo aad sii baadhi kartaa baaritaanada dheeraadka ah si loo turjumo macluumaadka dawlada. Raadi mid fuliya baahidaada.

Si aad u heshid macluumaad dheeraad ah oo Ingiriis ah, booqo www.australia.gov.au.